

Golaha Shacabka Jamhuuriyada Federaalka  
Soomaaliya  
Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorshaynta  
iyo La-Xisaabtanka Haay'adaha Dowladda



جمهورية الصومالي الفدرالية  
مجلس الشعب  
لجنة الشؤون الميزانية، المالية، التخطيط،  
ومحاسبة هيئات الدولة

**House of the People of the Federal Republic of Somalia  
Committee on Budget, Finance, Planning and Financial  
Oversight of Public Institutions**

---

---

**WARBIXINTA GUDDIGA EE ODOROSKA  
MIISAANIYADDA QARANKA EE SANNADKA 2018**

---

December 13, 2017

## **HORDHAC**

Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee 2018 waa Miisaaniyad Sanadeedkii 2aad ee uu falanqeeyo Guddiga Maaliyadda, Miisaaniyadda, Qorshaynta iyo la xisaabtanka hay'adaha dowladda ee Golaha Shacabka 10aad ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Guddigu waxa uu u xilsaaranyahay isagoo wakiil uga ah Golaha Shacabka sida ku xusan Qodobka 67aad, Faqradiisa 7aad ee Xeerhoosaadka Golaha Shacabka arrimaha Miisaaniyadda.

Guddigu isagoo si guud oo dhammeystiran u eegaya Qoondada Miisaaniyadda tixgelinayana soo jeedimihi Golaha Shacabka, kana fiirinaya dhinacyada; (b) Siyaasadda Qorshaha Miisaaniyadda,(t) Xaqiiqada dhabta ah ee ay ku dhisantahay Miisaaniyaddu xisaab ahaan iyo sharci ahaanba (j) Hubinta isku dheelitirnaanta Dakhliga ka soo xaroonkara ilaha dhaqaale ee ku talagalka Miisaaniyaddu ku qotomo iyo (x) Kharashyada Qorsheysan ee Miisaaniyadda, wuxuu dulmar guud ku sameeyey kana baaraandegay oddoroska Miisaaniyadda 2018 oo loo soo gudbiyay Golaha Shacabka laguna wareejiyay Guddiga 20/11/2017.

### **Shuruucda iyo Siyaasadda Miisaaniyadda**

Sida habdhaqanka maaliyadeed ee soo gudbinta Miisaaniyada Guud ee Qaranka caadada u ah waa inay Xeerka Miisaaniyadda iyo lifaaqyada qoondada miisaaniyaddu koobayaan warbixinno dhammeystiran oo iftiiminaya dhinacyada kala duwan dhaqaalaha dalka guud ahaan iyo qoondada Miisaaniyadeed ee dalka si ay u fududaato in si sahlan loogu fahmo miisaaniyadda, arrimahaas oo ay ugu muhiimsanyihiin:

1. Shuruucda ay ku dhisan tahay Miisaaniyadda
2. Faahfaahin cad oo Dakhliga iyo Kharashka ah
3. Sababaha korar iyo dhimis kasta oo dakhli ama kharash cusub
4. Warbixinta Deymaha Qaranka iyo faahfaahintooda
5. Warbixinta deeqaha Qaran ee la filayo in la helo
6. Warbixinta dhigaalka/Keydka Qaranka
7. Warbixinta Mashaariicda Horumarineed ee dalka u qorsheysan.

### **Xeerka Qoondada Miisaaniyada ee aan wax ka badalka ku samaynay:**

Xeerka Qoondada ayaa dib loo eegay waxaana la isla gartay Guddiga iyo Wasaaradda maaliyadda in Qodobada qaarkood toosin lagu sameeyo. Haddaba meelaha wax laga badalay waxaa ka mid ah qodobada hoos ku cad.

### **2.3 : Miisaaniyad Wareejinta Xaafiiska Dhexdiisa**

#### **1. Wasiirku wuxuu xafiis dhexdiis.**

- B. Kala wareejin karaa qarashka miisaaniyadda joogtada ah walax walax haddii ay isku madax yihiin.
- T. Kala wareejin karaa miisaaniyadda mashruuc kuna wareejin karaa mashruuc kale kaddib markii hay'adda mashruucaasi hore ugu qoondaysnaa oggolaato, Ra'iisul Wasaaruhuna saxiixo.

## **2.4 : Miisaaniyad Wareejinta Xaafiisyada Dhexdooda**

1. Wasiirku wuxuu u wareejin karaa miisaaniyadda joogtada ah ee loo qoondeeyey xafiis dawladeed in loo wareejiyo xafiis kale, kaddib markii la xaqiijiyo in xafiiska loo qoondeeyey miisaaniyadda aanu wada isticmaali karaynin Miisaaniyaddaas hay'adda loo qoondeeyeyna oggolaato Ra'iisul Wasaaruhuna saxiixo.
2. Wasiirku wuxuu amri karaa in Miisaaniyadda mashaariicda ee loo qoondeeyey xafiis loo wareejiyo mashruuc xafiis kale, kaddib markii la xaqiijiyo in Miisaaniyad yaraanta xafiiska laga dabooli karo Miisaaniyadda mashaariic loo ansixiyey sannadkaas xafiis kale oo dawladeed.
3. Wasiirku waa inuu kusoo wargeliyaa Guddiga kala wareejinta ku xusan Qodobka 2.3, Faqradiisa (B) iyo (T) iyo Qodobka 2.4, Faqradiisa (1) iyo (2) ee Qoondada Miisaaniyadda si uu hubiyo sharci ahaan in ay waafaqsantahay xeerka iyo habraaca Miisaaniyadda ee sannad maaliyadeedka 2018ka.

## **2.5 Wareejinta Miisaaniyadda Keydka (Lama filaanka ah)**

1. Wasiirku wuxuu kaddib oggolaanshaha Golaha Wasiirrada amri karaa in miisaaniyadda kaydka lama filaanka loo wareejiyo loona isticmaalo kharash xaalad degdeg ah, kadib markii ay dhacaan hawlo gurmada degdeg ah oo u baahan kharash degdeg ah oo aanay baahidoodu horay u muuqanin waqtiga la diyaarinayay Miisaaniyada sanadka. Ansixinta Golaha Wasiirrada kaddib Wasiirka waxa uu la wadaagayaa Guddiga oggolaanshaha Golaha Wasiirrada ee wareejinta kaydka lama filaanka ah oo sababeysan, si uu hubiyo sharci ahaan in ay waafaqsantahay xeerka iyo habraaca Miisaaniyadda ee sannad maaliyadeedka 2018ka. Kolka uu wasiirku saxiixo soo wareejinta khaarashka kaydka kabidda waxaa lagu wareejinayaa hay'adda ka mas'uulka ah.
2. Kharashka kaydka lama filaanka waxaa keliya oo loo isticmaali karaa xaalad degdeg ah sida fatahaado, abaaro, cudurro dillaacay, ama kharashaad muhimmad Qaran oo lama huraan ah leh oo aan muuqanin markii la diyaarinayay qoondada Miisaaniyadda, loomana isticmaali karo baahida kharashka caadiga ah ee xaafiisyada dowladda.

## **2.6 Miisaaniyadda Kabista:**

Golaha Shacabka isagoo ka duulaaya tala bixinta Golaha Fulinta ayuu meel marinayaa miisaaniyadda kabista ah si waafaqsan Qodobka 69aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka.

## **2.7 Daymaha/Qaamaha**

Daymaha iyo Amaahda sharcieysan ee laga dhaxlay Miisaaniyaddii 2016 iyo 2017-ka ayaa noqonaya qaanbaxa u gudbaya sannadka 2018-ka, waxayna noqoneysaa qeyb ka mid ah mudnaanta kharashka. Wasaaradda ayaa u xilsaaran xaqiijinta dhammaan daymaha iyo amaahda kuwooda sharciga ku qotoma iyo kuwa hareer marsan.

### 3.1 Mudnaanta Kala Horumarinta Qarash Bixinta

Haddii ay timaaddo hoos u dhac dhanka dakhliga ah ama deeqaha wasaaradduna fulinweydo bixinta dhammaan kharashaadkii ku talagalka miisaaniyadda 2018, waxaa mudnaanta kharash bixinta loo raacayaa sida ay u kala horreeyaan ee hoos ku taxan marka laga reebo khidmada uu ku shaqeeyo Bangigu:

1. Raashinka iyo gunnooyinka ciidamada qalabka sida.
2. Mushaarooyinka/gunnooyinka shaqaalaha Rayidka ah
3. Gunnada Xildhibaanada iyo Golaha Wasiirrada
4. Adeegga iyo agabka Xafiisyada Dowladda Federaalka iyo Goballada
5. Mushaarka iyo gunnooyinka daynta ah ee kasoo wareegay Miisaaniyadda sannanadihii hore.
6. Daynta iyo qaamaha sharciga ah.

Guddigu wuxuu ku adkeynayaa Wasaaradda Maaliyadda in ay qaraarka Golaha Shacabka ee mudnaanta kala horumarinta qarash bixinta ee xeerka Miisaaniyadda 2018 ay u fuliso sida uu u qoranyahay.

### 3.8 Warbixin Xisaabeedka

- 1) Dhamaan Hay'adaha Dowladda waa in ay u keenaan Xisaabiyaha Guud iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda dhamaan xisaab xidhka kharashka iyo dakhliga ee bishaas ugu danbeyn 7da bisha xigta iyadoo la raacayo qaabka uu tilmaamayo Xisaabiyaha Guud. Waxaa awood loo siiyey Wasaaradda inay hakiso bixinta qoondada miisaaniyadda ee haya'daha keeni waaya xisaab-xirka billaha ah.
- 2) Wasaaradda Maaliyaddu waa in ay usoo gudbisoo bil walba warbixin bileedka maaliyadeed Guddiga ugu danbayn 10 ka bisha xigta.

## 4. Sharciga Canshuuraha iyo Tacriifooyinka

- Guddiga iyo Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay isla garteen in Sharciga canshuuraha iyo tacriifooyinka la hor keeno Golaha Shacabka ugu danbayn 30 Abriil, 2018ka.

## Muuqaalka Guud ee Miisaaniyadda 2018

Guddiga isagoo maskaxda ku haya arrimaha korku xusan, tixgelinayana duruufaha dalku ku suganyahay wuxuu muddo labo todobaad ah ku hawlanaa ka baaraandegista Miisaaniyadda Qaranka ee Sannadka 2018, taasi oo muujinaysa muuqaalka hoos ku xusan.

Sida uu tusayo Jaantuskalaadee kutala galka Miisaaniyadda 2018 ka oo dhan **\$274.6 Malyan** waxaa ka muuqda in Miisaaniyaddu wali si weyn ugu kooban tahey kharashaadka Adeegga Maamulka iyo Difaaca taas oo looga qoondeeyay miisaaniyadda joogtada ah qaddar dhan **\$260.2 Malyan** una dhiganta **94.8%**. Halka hadhaaga oo dhan **\$14.4 Malyan** looguna talo galay mashaariicda horumarineed oo u dhiganta **5.2%** Qoondada Miisaaniyadda 2018.

## Jaantuska 1aad: Muuqaalka Guud ee Miisaaniyadda Sannadka 2018

Madaxa	Faah-faahinta	Ku Noqoshada 2017	Boqolkiiba Kunoqoshada %	Ku talagaka 2018	Boqolkiiba kutalagalka %
100	Hay'adaha Adeegga Maamulka Guud	\$142.5	54.8%	\$119.6	43.6%
200	Hay'adaha Adeegga Difaca iyo Amniga	\$88.3	34.0%	\$89.8	32.7%
300	Hay'adaha Adeegga Dhaqaalaha	\$20.9	8.0%	\$20.3	7.4%
400	Hay'adaha Adeegga Bulshada	\$8.3	3.2%	\$19	6.9%
500	Mashaariicda	0	0	\$25.9	9.4%
	Wadarta	<b>\$260.0</b>	<b>100%</b>	<b>\$274.6</b>	<b>100%</b>

### Ku tala galka Deeqaha labada dhinac ah

No	Faah faahinta dhinacyada	Wadarta
1	Turkey	\$20,000,000.00
2	Qatar	\$10,000,000.00
3	Saudi Arabia	\$32,360,000.00
	Wadarta Guud	<b>\$62,360,000.00</b>

### Falanqaynta iyo Talo Bixinta Guddiga

Guddigu wuxuu kulamo falanqayn ah la yeeshay Madaxda Wasaaradda Maaliyadda oo uu hoggaaminayo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda. Sidoo kale guddigu wuxuu warbixinno iyo cabashooyinba ka dhageystay qaybo ka mid ah mas'uuliyiinta hay'adaha dowladda. Haddaba markii si qoto dheer loo falanqeyay loogana baaraandegay ku talagalka Miisaaniyadda ee dakhliga iyo kharashka sannadka 2018 waxaa u soo baxay arrimaha hoos ku qoran oo uu guddigu ka tilmaan bixinayo.

#### Dakhliga Miisaaniyadda

Dakhliga miisaaniyaddu wuxuu ka kooban yahay canshuuraha iyo khidmadaha kala duwan ee sharcigu jideeyay, kaalmooyinka ama deeqaha iyo daymaha qaranku ka soo deynsado gudaha iyo dibeddaba, haraaga miisaaniyadihii hore haddii uu jiro iyo dakhlikasta oo la filayo in si sharciga waafaqsan ugu soo korodho miisaaniyadda.

1. Guddigu markii uu eegay saadaasha dakhliga gudaha ee miisaaniyadda 2018 oo ah \$156 Malyan waxa u muuqdey isbeddel korodhsiimo marka loo eego saadaashi ku noqoshadi miisaaniyadda sanadkii 2017ka oo ahaa \$137 Malyan, kororkaas oo noqonaya boqoley ahaan 13.8%.
2. Marka la eego saadaasha deeqaha laba dhinaca ah ee miisaaniyadda 2018 oo ah \$62.4 Malyan kana muuqdo koror marka loo eego saadaashi sannadkii 2017 oo ahaa \$38 Malyan, kororkaas oo noqonaya boqoley ahaan 64%.

3. Sidoo kale marka la eego odoroska deeqaha dhinacayada badan ah ee miisaaniyadda 2018 oo ah \$56 Malyan, waxaa ka muuqdo hoos u dhac marka loo eego saadaashi miisaaniyaddi sannadkii 2017 oo ahaa \$84 Malyan, hoos u dhacaas oo noqonayo boqoley ahaan -33%.
4. Saadaasha Dakhliga gudaha ee dalka guud ahaan waa \$156 Malyan oo u dhiganta **57%** halka ay saadaasha dakhliga dibaddu tahay \$118.6 Malyan oo u dhiganta **43%** haddaba taasi waxaa ay muujinaysaa in aysan ka turjumeyn hal kudhigga Miisaaniyadda 2018 oo ah **“ku tiirsanaanta dhaqaalaheena”**.
5. Guud ahaan dakhliga soo xarooday 10 bil ee ugu horraysay sannadkaan (Jan.–Oct. 2017) waxaa uu gaarayaa \$182.9 Malyan oo lamid ah bishiiba celcelis ahaan \$18.29 Malyan taas uu muujinaysa in sanadkan 2017 ee dhammanaya guud ahaan saadaasha dakhligu noqonayo ku dhawaaad **\$220** Malyan maadaama 2 bil oo kaliya ka hartay sannadka sidaasi darteed waxaa ay u muuqataa in aan la gaari kari doonin saadaashi dakhliga ee ku noqoshada miisaaniyadda 2017 oo ahayd \$260 Malyan haddii aysan kabin deeq dibadeed.

### **Kharashka Miisaaniyadda**

Kaddib markii guddigu uu falanqeeyay kana baaraan dagay habka qoondaynta kharashaadka waxaa usoo baxday sidaan:

1. In kharashaadka Miisaaniyadda aan loo qorshaynin si isku dheelitiran, iyada oo hay’adaha qaar loo qoondeeyay lacago badan halka kuwa u xilsaaran howlo muhiim ahna loo qoondeeyay wax aad uga yar baahdidooda dhabta ah sida hay’adaha Amniga iyo Garsoorka.
2. Waxaa kale oo guddiga usoo ifbaxay in aan habka kharash bixinta loogu dhaqmin si waafaqsan Mudnaanta kala horumarinta kharash bixinta sida ku cad xeerka qoondada Miisaaniyadda 2017 ee Golaha Shacabku meelmariyay.
3. Guddiga iyo wasaaradda maaliyaddu waxay isla garteen in kharashaad duuduub ah ee ku kala jira madaxyo iyo hay’ado kala duwan la faahfaahiyo sidan hoos ku xusan;
  - b. In lacagta curaarta oo dhan \$8.4 malyan oo ka mid ah lacagaha duubka ah lagu bixiyo; gunnooyinka xildhibaanadii Baarlamaanka sagaalaad, xuquuqda shaqaalaha iyo daymaha mudnanaanta leh.
  - t. Dhamaan lacagaha raasumaalka ah ee ku jira miisaaniyadda 2018 ka in lagu bixin karo oo keliya maashaariicada loogu talo galay iyadoo loo raacayo nidaamka uu tilmaamyo Sharciga Iibka Qaranka.
  - j. In kabka miisaaniyadeed ee Dawladda Federaalku siiso Dawlad goboleedyada iyo Gobolka Banadir faahfaahintooda oo kooban la hor keeno guddiga kahor dhammaadka Abril 2018 sidoo kalena in lagu soo faahfaahiyo (Budget gareeyo) Miisaaniyadda 2019 ka.

## Wax ka beddelka Qoondada Miisaaniyadda

### Jaantuska 2aad: Wax ka Beddelka Miisaaniyadaha Hay'adaha Qaarkood

Madax	Madax Xige	FAAH-FAAHIN	2018 Kutalgalka Miisaaniyadda	Dhimis Ku Daris	2018 Miisaaniyadda Cusub
1		<b>Wadarta Guud</b>	<b>34,517,482</b>	<b>12,000</b>	<b>34,529,482</b>
<b>10503</b>		<b>Adeegga Guud Ee Dowladda</b>	<b>33,389,482</b>	<b>12,000</b>	<b>33,401,482</b>
	<b>2100</b>	<b>Adeegga Shaqaalaha</b>	<b>8,000,000</b>	<b>-</b>	<b>8,000,000</b>
	<b>2150</b>	<b>Curaarta Mushaharaadka iyo Gunnooyinka</b>	<b>8,000,000</b>	<b>-</b>	<b>8,000,000</b>
	2151	Curaarta Mushaharaadka iyo Gunnooyinka	8,000,000		8,000,000
	<b>2200</b>	<b>Adeegga iyo Agabka</b>	<b>4,399,482</b>	<b>(488,000)</b>	<b>3,911,482</b>
	<b>2210</b>	<b>Kharashaadka Guud</b>	<b>-</b>	<b>300,000</b>	<b>300,000</b>
	2211	Hawlaha Guud		300,000	300,000
	<b>2240</b>	<b>Kharaska Maamulka Maaliyadda</b>	<b>3,249,482</b>	<b>(268,000)</b>	<b>2,981,482</b>
	2241	Khidmadda Bangiga	3,249,482	(268,000)	2,981,482
	<b>2260</b>	<b>Kharashaadka kale</b>	<b>150,000</b>	<b>-</b>	<b>150,000</b>
	2261	Kharashaadka kale (Munaasabado)	150,000		150,000
	<b>2270</b>	<b>Curaar</b>	<b>1,000,000</b>	<b>(520,000)</b>	<b>480,000</b>
	2271	Curaarta- Adeegga iyo Agabka	1,000,000	(520,000)	480,000
	<b>2600</b>	<b>Deeqaha</b>	<b>17,490,000</b>	<b>500,000</b>	<b>17,990,000</b>
	2621	Qaaraanka Hay'adaha Caalamiga ah	560,000		560,000
	<b>2660</b>	<b>Deeqaha Maamulka Goboladda</b>	<b>16,930,000</b>	<b>500,000</b>	<b>17,430,000</b>
	2661	Wadahadalka Soomaaliland iyo DF. Soomaaliya	200,000	(100,000)	100,000
	2662	Maamulka Puntland	2,000,000	120,000	2,120,000
	2663	Maamul Goboleedka Jubba land	1,080,000	120,000	1,200,000
	2664	Maamul Goboleedka Koofur Galbeed	1,000,000	120,000	1,120,000
	2665	Maamul Goboleedka Galmudug	1,000,000	120,000	1,120,000
	2666	Maamul Goboleedka Hirsabelle	1,000,000	120,000	1,120,000
	2666	Maamulka Gobolka Banaadir	10,650,000		10,650,000
	<b>2300</b>	<b>Kharashaadka Raasumaalka</b>	<b>1,000,000</b>	<b>-</b>	<b>1,000,000</b>
	2314	Raasumaalka	1,000,000		1,000,000
	<b>2800</b>	<b>Kaydka Kabidda</b>	<b>2,500,000</b>	<b>-</b>	<b>2,500,000</b>
	2821	Kaydka Kabidda	2,500,000		2,500,000
<b>10509</b>		<b>Xarunta Warbixinada Maaliyadda</b>	<b>660,000</b>	<b>-</b>	<b>660,000</b>
	<b>2100</b>	<b>Adeegga Shaqaalaha</b>	<b>436,452</b>	<b>-</b>	<b>436,452</b>
	<b>2110</b>	<b>Gunooyinka iyo Mushaharaadka</b>	<b>436,452</b>	<b>-</b>	<b>436,452</b>
	2111	Mushaarka Shaqaalaha Joogtada ah	243,252		243,252
	2112	Gunno	193,200		193,200
	<b>2200</b>	<b>Adeegga iyo Agabka</b>	<b>223,548</b>	<b>-</b>	<b>223,548</b>

	<b>2210</b>	<b>Kharashaadka Guud</b>	210,000	-	210,000
	2211	Hawlaha Guud	60,000		60,000
	2212	Kiro	36,000		36,000
	2213	Shidaal & Saliid	18,000		18,000
	2214	Dayactir & Hagaajin	12,000		12,000
	2215	Alaabta Xafiiska iyo Agabyada kale	24,000		24,000
	2216	Kharashaadka Socdaalka	60,000		60,000
	<b>2220</b>	<b>Kharashadka W. Iyo Tababarada</b>	13,548	-	13,548
	2222	Kharashaadka Tababarada	13,548		13,548
<b>10701</b>		<b>Wasaaradda Arrimaha Gudaha</b>	<b>8,458,621</b>	<b>(240,000)</b>	<b>8,218,621</b>
	<b>2100</b>	<b>Adeegga Shaqaalaha</b>	<b>1,587,288</b>	<b>-</b>	<b>1,587,288</b>
	<b>2110</b>	<b>Gunooyinka iyo Mushaharaadka</b>	<b>1,587,288</b>	<b>-</b>	<b>1,587,288</b>
	2111	Mushaarka Shaqaalaha Joogtada ah	1,286,088		1,286,088
	2112	Gunno	301,200		301,200
	<b>2200</b>	<b>Adeegga iyo Agabka</b>	<b>1,471,333</b>	<b>(240,000)</b>	<b>1,231,333</b>
	<b>2210</b>	<b>Kharashaadka Guud</b>	271,333	-	271,333
	2211	Hawlaha Guud	57,752		57,752
	2212	Kiro	33,000		33,000
	2213	Shidaal & Saliid	66,000		66,000
	2214	Dayactir & Hagaajin	4,582		4,582
	2215	Alaabta Xafiiska iyo Agabyada kale	22,000		22,000
	2216	Kharashaadka Socdaalka	88,000		88,000
	<b>2260</b>	<b>Kharashaadka kale</b>	1,200,000	(240,000)	960,000
	2261	Kharashaadka kale (Raashin)	1,200,000	(240,000)	960,000
	<b>2600</b>	<b>Deeqaha</b>	<b>5,400,000</b>	<b>-</b>	<b>5,400,000</b>
	2664	Maamul Goboleedka Koofur Galbeed	1,800,000		1,800,000
	2665	Maamul Goboleedka Galmudug	1,800,000		1,800,000
	2668	Maamul Goboleedka Hirsabelle	1,800,000		1,800,000
<b>20201</b>		<b>Wasaaradda Amniga Qaranka</b>	<b>2,228,780</b>	<b>(240,000)</b>	<b>1,988,780</b>
	<b>2100</b>	<b>Adeegga Shaqaalaha</b>	<b>816,780</b>	<b>-</b>	<b>816,780</b>
	<b>2110</b>	<b>Gunooyinka iyo Mushaharaadka</b>	<b>816,780</b>	<b>-</b>	<b>816,780</b>
	2111	Mushaarka Shaqaalaha Joogtada ah	642,780		642,780
	2112	Gunno	174,000		174,000
	<b>2200</b>	<b>Adeegga iyo Agabka</b>	<b>1,412,000</b>	<b>(240,000)</b>	<b>1,172,000</b>
	<b>2210</b>	<b>Kharashaadka Guud</b>	187,000	-	187,000
	2211	Hawlaha Guud	22,000		22,000
	2212	Kiro	22,000		22,000
	2213	Shidaal & Saliid	33,000		33,000
	2214	Dayactir & Hagaajin	22,000		22,000
	2215	Alaabta Xafiiska iyo Agabyada kale	22,000		22,000



	2216	Kharashaadka Socdaalka	66,000		66,000
	<b>2250</b>	<b>Adeegga iyo Qalabka Gaarka ah</b>	25,000	-	25,000
	2255	Alaabaha & Adeegga kale ee Gaarka ah	25,000		25,000
	<b>2260</b>	<b>Kharashaadka kale</b>	1,200,000	(240,000)	960,000
	2261	Kharashaadka kale (Raashin)	1,200,000	(240,000)	960,000
<b>11604</b>		<b>Guddiga Xuquuqul Insaanka</b>	<b>468,000</b>	-	<b>468,000</b>
	<b>2100</b>	<b>Adeegga Shaqaalaha</b>	<b>384,000</b>	-	<b>384,000</b>
	<b>2110</b>	<b>Gunooyinka iyo Mushaharaadka</b>	<b>384,000</b>	-	<b>384,000</b>
	2112	Gunno	384,000		384,000
	<b>2200</b>	<b>Adeegga iyo Agabka</b>	<b>84,000</b>	-	<b>84,000</b>
	<b>2210</b>	<b>Kharashaadka Guud</b>	84,000	-	84,000
	2211	Hawlaha Guud	24,000		24,000
	2213	Shidaal & Saliid	12,000		12,000
	2214	Dayactir & Hagaajin	12,000		12,000
	2215	Alaabta Xafiiska iyo Agabyada kale	12,000		12,000
	2216	Kharashaadka Socdaalka	24,000		24,000

### Talooyin iyo Soo Jeedimo

Dhammaan soo jeedimaha soo socda waxaa ay noqonayaan qaraar marka Golaha Shacabku ansixiyo waxaana la farayaa wasaaradda Maaliyadda in ay u fuliso sida Golaha Shacabku u ansixiyay waxayna kala yihiin sidatan:

1. Guddigu waxa uu Golaha ku wargelinayaa in aanan la dhaqan gelin qaraarkii Golaha Shacabku ku ansixiyay ku noqoshadii miisaaniyaadda 2017 sidaas darteed si loo ilaaliyo hufnaanta maaliyadda, guddigu wuxuu aad ugu adkaynayaa Wasaaradda hirgelinta qaarada Golaha Shacabka ee ku wajahnaa hagaajinta hawlaha dakhliga iyo maamulka kharashaadka dowladda.
2. Guddiga waxaa u soo baxday in Wasaaraddu isticmaashay dakhli kayimid ilo aan hore miisaaniyadda 2017 uga mid ahayn loona isticmaalay khasrashaad aan hore uga mid ahayn Miisaaniyada 2017, taas oo aan waafaqsanayn nidaamka maaliyadeed ee dalka. Haddaba guddigu waxaa uu soo jeedinayaa in aan dakhli iyo kharash aan ka mid ahayn miisaaniyadda la isticmaali karin iyada oo aan la horkeenin Golaha Shacabka lana qoondeynin si waafaqsan qodobka 69aad ee Xeerhoosaadka Golaha Shacabka.
3. Guddigu waxaa uu soo jeedinayaa in Wasaaradda Maaliyaddu sameyso qorshe cad oo lagu dardar gelinayo howlaha dakhli ururinta, warbixinna ka soo siiso guddiga ka hor bisha June 2018, maadaama saadaasha dakhli ururinta meelaha qaar ay ka muuqato hoos u dhac aan sababeysnayn sida isgaarsiinta oo sanndihi hore gaari jirtay 4.8 Malyan haddana lasoo qoondeeyay 3.5 malyan iyada oo la filayay koror maadaama la meel mariyay sharcigii isgaarsiinta.

4. Sida ku cad qaraarkii Golaha Shacabka ee xeerka ku noqoshada qoondada miisaaniyadda 2017 Goluhu waxaa uu go'aamiyay in gunnada ciidamada aan darajada wax ku qaadan lagu kordhiyo konton doolar (\$50) bil walba laga bilaabo bisha Nov. 2017, balse aanan hirgelin sababo la xiriira arrimaha diiwaangelinta. Haddaba Guddigu wuxuu soo jeedinayaa: (b) in Wasaaradda Gaashaandhigu soo dhammeystirto diiwaangelinta ciidamada Qalabka sida ka hor bisha June 2018, (t) In Wasaaraddu Maaliyaddu warbixin ka siiso guddiga ugu dambeyn 30 March 2018 hawlaha diiwaan gelinta ee ciidamada Qalabka sida, (j) laga bilaabo 1da Luulyo 2018 ka waxaa gunnada \$50 ah loo kordhinayaa oo keliya ciidamada buuxiyey shuruudda diiwaangelinta.
5. Sida ku cad qaraarkii Golaha Shacabka ee ku noqoshada Miisaaniyada 2017, guddigu waxa uu u soo jeedinayaa Wasaaradda Maaliyadda in ay usoo gudbisoo Guddiga Maaliyadda liiska daymaha oo faah faahsan iyo qorshaha lagu bixinayo ugu danbayn 30 April 2018.
6. Guddigu waxaa uu soo jeedinayaa in Miisaaniyadda Safaaradaha loo qoondeeyay lagu shubo akoomada Safaaradaha ay ku leeyihiin Bangiga Dhaxe. Safaaradii aan akoon lahayna si deg deg ah loogu furo.
7. Guddigu waxa kale oo uu Golaha u soo jeedinayaa in wasaaradda la faro soo diyaarinta xeer Miisaaniyadeed Qaran oo lagu salayn doono gunno xileedyada Siyaasiinta si waafaqsan Sharciga iyo Xeerarka Golayaasha Qaranka ka hor sanadka 2019.
8. Si loo ilaaliyo xuquuqda muwaadinka iyo hufnaanta maaliyadda Dowladda guddigu wuxuu soo jeedinayaa in cidkasta oo qaadata mushaar joogto ah ama gunno Dowladeed (siyaasiyiin, ciidan iyo shaqaalaha rayidka) loo furo xisaab (account) u gaar ah oo si joogta ah loogu shubo/wareejiyo.
9. Guddiga iyo Wasaaradda waxay isla garteen in lacagta 3 Malyan ah ee ku qoran Wasaarada Dastuurka gaar ahaan madax xigaha qarashaadka kale in loo sameeyo xisaab u gaar ah (Account), oo loogu talo galay howlaha dib-u-eegista iyo dhaqangelinta Dastuurka xisaabtaas oo ay si wada jir ah u maamulaan Wasaarada dastuurka, guddiyada labada gole Dastuurka iyo Guddiga madaxa banana ee dib u eegista dastuur, Guddigu waxaa uu adkaynayaa in aan lacagtaas loo wareejin Karin madax xige kale sidoo kale aan loo adeegsan Karin kharashaad kale oo aan ahayn howlaha dib u eegista dastuurka qaranka.
10. Guddigu waxaa uu ku adkaynayaa Wasaaradda Maaliyadd, Xisaabiyaha guud iyo hantidhowraha qaranka in aan la bixin lacag aan soo marin habraaca nidaamka maaliyadeed ee dalka.
11. Guddigu waxaa uu soo jeedinayaa in kadib marka la ansixiyo Miisaaniyaada dib loogu qaybiyo Golaha Shacabka nuqulka rasmiga ah ee Goluhu ansixiyay ka hor inta aan la dhaqan gelin Miisaaniyadda 2018.

### **Gabogabo**

Hadaba guddigu wuxuu ka codsanayaa Golaha Sharafta leh isagoo gudanaya waajibaadkiisa dastuuriga iyo Xeer hoosaadka Golaha Shacabka in ay ansixiyaan xeerka Miisaaniyadda Sannadka 2018.

=====DHAMMAAD=====